



San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

(619) 725-5506

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Maajo2007

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah,

Wey adag tahay inaan aammino in xilligan aan ku jiro ee gu'ga ah ay dugsiyadeenna isla diiwaan geliyaan ardeyda dugsiya sare ka qalin jebin doonta sannadka 2020. Waalidiinta ardeyda soo galeysa fasalka xanaanada oo kumaan kum ah ayaa xilliga dayrta ka diiwaangelineya carruurtooda shan jirka ah ee niyada iyo tabartaba u haya inay dugsiyada soo galaan. Sidaada oo kale waalidiintaasu waxay niyada ku hayaan inay carruurtoodu waxbarashadda ku guuleystaan. Sidaada oo kale waxay aaminsan yihiin in xubno ka mid ah qoysaskoodu ay dugsiyadeenna wax ku baranayaan, isu diyaarineyaan kulleejooyinka, shaqooyinka xirfada leh, iyo mustaqbalka iyo nololsha wanaagsan. Waxay og yihiin inay waxbarashadda wanaagsan muhim u tahay rajada Maraykanka taas oo habboon in dhab laga dhigo.

Waalidiinta iyo macallimiinta wanaagsani maalin kasta qiimo weyn ayey ugu fadhidaa. Laga bilaabo fasalada xanaanada ilaa iyo dugsiya sare, sida dakhsaha ah ee ay maalmaha dugsiya la dhigto oo ah 2,340 sida dhakhsaha ah ugu soconayaan. Taas oo ah ka bilaabmeysa maalinta uu ardeygu fasalka xanaanada galeyo ilaa inta uu dharkii qalin jebinta xidhaneyo. Muddadaas 13 sanno ee taariikhiga ah waxaa uu ilmuhu la kulmeyaa waayo-aragnimo wacan iyo fursado uu wax ku barto, kuna barbaaro. Waxaan ku rajo weynahay inaan u hawl galida waxbarashadda mudnaan siin doontaan, taas oo ah imaanshaha dugsiya intaba.

Macalliminta iyo shaqaalaha dugsiyaddennu waxay sannadkan dadaal dheerad ah u geli doonaan sidii ay baahida waxbarasho u dabooli lahaayeen. Waxaan rabnaa inaan ilmo kasta ka caawino xirfadaha waxbarashadda iyo weliba sidii uu uga faa'iideysan lahaa casharada maalin kasta la bixiyo si ay waxbarashadiisu u wanaagsanaato.

Maadaama aan soo galeyno wakhtigii muhimka ahaa ee bisha Juunyo, waxaan idiin ka baahanahay dhiirigelin iyo weiba taageero. Taageerada aad u geysataan ilmihiiina intu guriga joogo waxay wax weyn ka tareysaa waxbarashadda uu dugsiya ku qaadaneyo. Hada waxaan ku jiraa wakhtigii ay ardeydu u feejignaan lahaayeen, imtixaanada u diyaar garoobi lahaayeen; hurdo macaan seexan lahaayeen; ay yareyn lahaayeen daawashada telefishinka, ciyaar fidiyowga oo ay muhimada siin lahaayeen shaqooyinka inay guriga ku soo qabtaan loogu soo diro. Dadaalkaas dheeraadka ahi wuxuu keeni doonaa inay ardeydu waxbarashadda ku guuleysato, isla mar ahaantaasna, buundooyin fiican keenaan.

Waxaan idin ku boorineyaa inaad carruurtiinna ku dhiiri gelisaan inay ka faa'iideystaan fursadaha waxbarasho ee aan maalin kasta dugsiya ku bixino. Ka qeyb galaan, inta awoodooda ahna wax ka bartaan. Waxaan dadka aan u adeegno ula dhaqmeynaa sidii ay qoyskeyaga yihiin oo kale. Waxaan aad idiin ka mahad celineynaa sida wacan ee aad carruurtiina ugu dhiiri geliseen inay inta awoodooda ah sameyaan xilligan gu'ga ee kama dambeysta ah. Taas ayaan ula jeednaa in isbeddelada nololshu ay dugsiyada tahay.

Si daacadnimo ah,

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada
Somali version: 05.May07 PTA eng Ltr nosig